Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

27/04/2015\

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka F. Soomaaliya Muqdisho

Ujeeddo: **Soo jeedin ka dhan ah Baarlamaanka lagaga dhawaaqay Maamulka KMG Jubba**

Annagoo ah Xildhibaanada ay magacyadooda hoos ku saxiixan yihiin, kana tirsan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Waxaan halkan Baarlamaanka sharafta leh ugu soo gudbinaynaa soo jeedin ka dhan ah wax auu Maamulka KMGs jubba ugu yeeray Baarlamaanka ee 15kii bishan April 2015 uu kaga dhawaaqay magaalada Kismaayo.

Markaan aragnay Qodobka 4aad faq.1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee tilmaamaya sarreynta Dastuurka

Markaan aragnay Qodobka 46aad faq. 1aad, 2aad iyo 3aad ee Dastuurka Federaalka ee tilmaamaya in isxukunka uu ka bilowdo shacbiga, kuna dhamaado shacbiga iyo inay kula xisaabtamaan hay'adaha matila xilka ay u dhiibteen

Markaan aragnay Qodobka 49aad faq. 4aad iyo 5aad ee dastuurka J. Federaalka Soomaaliya ee tilmaamaya Degmooyinka iyo Gobollada qaranku aqoonsan yahay in ay yihiin kuwii jiray 1991kii iyo xuduudeyntooda, iyadoo Maamulka Jubba uu meel aan degmo ahayn ku magacaabay inay degmo tahay laguna soo daray tirada Degmooyinka Baarlamaanka laga xulaayo, taasoo ah **Tuulada Salagle** oo ka tirsan Degmada Saakow ee Gobolka J/Dhexe

Markaan aragnay Qodobka 8aad ee Heshiiskii 27/08/2013 magaalada Addisababa Ethiopia ku dhexmay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Hoggaanka Maamulka KMG jubba ee tilmaamaya in dhismaha hay'adaha Maamulka Jubba lagu saleeyo Dastuurka J.Federaalka Soomaaliya, islamarkaana dhisidda iyo xulitaanka baarlamaanka si buuxda uga qaybgalaan Odayaasha dhaqanka iyo waxgaradka degaanka wixii ka soo baxana uu ansixiyo Baarlamaanka fedraalka.

Markaan aragnay Qodobada 41 iyo 48aad ee Xeerhoosaadka Baarlamaanka ee tilmaamaya habka soo jeedinta ee Mudanayaashu ugu soo gudbinayaan Baarlamaanka

Markaan ogaanay in waxa uu Maamulka KMG jubba ku sheegay Baarlamaanka aan lagala tashan, lagana tixgelin dadkii xaqa u lahaa in ay Baarlamaanka Maamukaas dhismihiisa qaybta ka ahaadaan, Sida Odayaasha dhaqanka, siyaasiyiinta iyo waxgaradka degaanka.

BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFISKA GUDDOOMIYAHA
GELID / RECEIVED
TAR: 4/5/2015
TIX: 582
SIXIIX: Ismaacil

Markaan ogaanay in Goobta lagu sheegay in Baarlamaan lagu dhisaayo aysan joogin cid ka wakiil ah Dawladda Federaalka oo ahayd in ay iyadu qabato hogaanka barnaamijka oo dhan, dhexdhaxaadisana Beelaha wax qaybsanaaya, iyadoo taa beddelkeedana ay maamulayeen wakiilo ka socda Urur-Goboleedka IGAD oo aan iyagu doorkaas lahayn

Markaan aragnay in Odayaashii dhaqanka ee Gobolladaas ay Shirka isaga soo baxeen, ka dib markii ay arkeen in si bareer ay Madaxda Maamulka KMG jubba ugu xadgudbeen Dastuurka, Shuruucda iyo nidaamka loo dejiyey dhismaha Baarlamaanka Maamulkaas, doorkoodiina meesha laga saaray.

Markaan ogaanay in Beelo waaweyn oo Gobolladaas si rasmi ah u deggen, bolaal sanana deggenaa lagu yiri maba deggenadiin dhulkan, Odayaashoodiina loo diiday in ay magaca degaankooda shirka kaga qaybgalaan.

Markaan ogaanay in Beelihii ugu waaweynaa ee degenaa qaybo ka mid Gobolladaas in badan oo ka mid ah aanba lagu soo xusin, kana qaybgelin shirka iyo talada dhismaha Baarlamaanka Maamulkaas

Markaan agarnay in Maamulka Jubaa uusan lahayn wax dastuur ama nidaam ah oo saldhig looga dhigo dhismaha Baarlamaanka, iyadoo sida qaanuuniga ah aan meel uusan dastuur ka jirin laga dhisi Karin Baarlamaan iyo hay'ado dawli ah

Markii ay noo muuqatay in waddada fowdada ah ee uu Maamulka Jubba ku dhaqaaqay ay tahay mid dib u soo cusbooneysiinaysa dagaalladdii iyo colaaddi sokeeye ee hadda bilaabatay ka soo kabashadeeda

Sidaa darted , ka dib markaan aragnay in Dastuurka, sharciyada iyo nidaamyada aan kor ku soo sheegnay uu Maamulka KMG Jubba si bareer ah u baalmaray, uguna xadgudbay,
annagoo gudanaynaa waajibaadkeenna dastuuriga ah iyo doorka matilaadda shacabka ee uu tilmaamayo Qod. 61aad ee Dastuurka, islamarkaana la xoojinaayo ku dhaqanka Dastuurka iyo shuruucda dalka, lana ilaalinaayo deggenaanshaha iyo nabad ku wada noolaanshaha bulshda degaankaas.
Waxaan Baarlamaanka sharafta leh si xushmad iyo qadderin leh ugu soo jeedinaynaa in Baarlamaanka uu go'aamiyo arrimaha soo socda:-

1- In Mudanayaasha sharafta leh ee Baarlamaanka F. Soomaaliyeed ay u codeeyaan, iskuna raacaan in la baabi'iyo lagana dhigo waxba kama jiraan, waxa uu Maamulka KMG jubba ugu yeeray Baarlamaanka, maadaama uusan waafaqsanayn Dastuurka iyo shuruucda dalka, halisna gelinaayo nabadda iyo deggenaanshaha degaankaas
2- In Dawladda Federaalka ay Dadka Gobolladaas si deg deg ah ugu qabato shir dib u heshiisiineed oo rasmi ah, loona dhan yahay

3- In Dawladda Federaalku dib u heshiisiin ka dib dadka degaanadaas u abaabusho sidii ay u dhisan lahaayeen Gole sharci dejin (Baarlamaan) ay u dhan yihiin, sida ku qoran Qod. 8aad ee heshiiskii Addis ababa ee 27/08/2013.

4- In Xukuumadda Federaalku degdeg uga hawlgasho sidii gacanta Dawladda loogu soo celin lahaa degaanada ka tirsan Gobolladaas ee weli ku hoos jira xukunka kooxda nabad-diidka, si ay dadka degaanku fursad ugu helaan ka qaybgalka dib u dhisidda dalka iyo ka talinta aayaha degaankooda.

5- Maadaama muddadii jiritaanka Maamulka KMG ee Jubba ay ku ektahay 26ka bisha Agoosto 2015, in dawladda Federaalku ay Dadka Gobolladaas u abaabusho sidii ay u dhisan lahaayeen Maamul rasmi ah oo ay Iyagu taladiisa leeyihiin, loona dhan yahay.

Wabillaahi towfiiq

Xildhibaanada saxiixay

1 Hon. Dahir Amin Jesow
2 Hon Abdi Kuti Moalim
3 Abdisatar Sh. Abdisalam
4 Amina Mohamed Abdi
5 Samira Hassan Abdulle
6 Mohamud Mohamud
7 Mohamed Ali Hussein
8 Abdurahman Adan Ibrahim
9 Ali Yusuf Osman
10 Mayow Mustaf Hurah
11 Hon Moalim Axmed Diirije
12 Hon Ibrahim Cali Cumar
13 Hon Adan Mohamed Ali
14 Hon Ciis Xasan Salah
15 Hon Avv. Dahir Hassan Abdi
16 Hon Tahlil Abdi Mohamed

Sayid Ali Cabdiqaadir Macalin [signature]

18 Raahuma Sheekh Nuur [signature]

19 Saman Mohamed Sh. Dahir [signature]

20 Khaliif sheekh Cabdillaahi [signature]

21 Axmed Mayow Cabdulle [signature]

22 Majid Abdi Ali [signature]

23 Othman Mohamed Warsame [signature]

24 Xasan Cismaan Xuseen [signature]

25 Sheekh Shoa Cir Sh. Maxamed [signature]

26 Abdo Mah Farah [signature]

27 Maxamuud Ali Magan [signature]

28 Cumar Cali Isxaaq [signature]

29 Mohamed Hussein Issac [signature]

30 Adan Maxiad Nuur (Sorbarar) / [signature]

31 AHMED HAJI MAXAMED (Yaasin) [signature]

32 OSMAN HAJI ALI [signature]

(15)

33 Hon. Abdullahi Omar Abshir

34 Hon Abdiwel Mohamed Ibrahim

35 Hon. Maxamud Maxamed Guuleed

36 HON: AHMED ADEN ABDI

37 Hon: Naeema Maxamed Galal

38 Sahra Maxamed

39 Hon. Siidow Aadan Abaadir

40 Hon: Mohamed Xasan

41 Cabdinaasir Gaarane Maxamed

42 Isgowe Jerow Isaaq

43 Ebiyad Xasan Geel

[illegible]